# Xayiraadda Ku XIran Shaqaalaynta ee MFIP & FSS

MFIP & FSS Employment Sanctions

## Waa maxay ganaaxu?


Marka xayiraad lagu saaro, qayb ka mid ah ama dhamaan barnaamijka MFIP waa lagaa joojinayaa. La taliyahaaga shaqa gaynta wuxuu ku saari karaa xayiraad haddii aadan samayn waxyaabihii lagaa rabay in aad samayso. Waxaa ka mid ah in aadan raacin qorshaha shaqaaleynta (EP), aadan keenin waraaqihii lagaa rabay, ka baaqatay kulamada, ama aadan aadin tegin dugsi (waxbarasho) oo aad ka yartahay 18 sano.

Marka lagu saaro xayiraad shaqaaleyn, barnaamijka MIFP, ama FSS waxaa lagaa jarayaa:

- 10% bisha ugu horeeysa
- 30% bisha 2-6, ama
- 100% bisha 7

bilaha 2-6, qaybta lacagta cadaanka ah waxaa siin qoladda guriga, adiga manfacyadaadda cuntadda waxaa lagaa jari 30%.

Warqaddan xogta urursan waxaad ka helaysaa xog ku saabsan xayiraadda shaqaalaynta. Laakiin waxaad xayiraad kala kulmi kartaa siyaabo kale:



- Waa in aad tagtaa fadhiga wacyi gelinta MFIP marki ay kuu bilaabato MFIP. Haddii aadan tegin degmadaadu waxay ku saari kaartaa xayiraad.

- Shaqaalaha kuugu qaybsan kaalmada caruurta waa ay kaa joojin karaan haddii aadan la shaqaynayn weydo. Xayiraadu waxay ku bilaabataa 30%, kaalmada caafimaadkana (MA) waa lagaa joojinayaa.

Haddaad rabto xog dheeraad aha, ama lagaa kaalmeeyo xiyiraadda, wac caawine sharki yaqaan ah ee 1(877) 696-6529.

## Sidee xayiraadda shaqageyntu u dhacdaa?

Waxaad laguu soo dirayaa ogaysiis leh ujeedo xayiraad (NOITS) oo ka timid la taliyaha shaqaaleynta. Taas macneheedu waxa weeye waxay digniin ku siinayaan in xayiraad kugu imaan karta. Ogaysiinta NOITS waxay kuu sheegaysaa waxyaabaha lagaa rabo in aad u in aad ku samayso si aan xayiraad laguu saarin. Haddii aadan samayn waxyaabahaas 10 maalmood gudohood, la taliyaha shaqa raadintu wuxuu degmada u sheegayaa in xayiraad lagu saaro.


Markaas degmadu waxay kuu soo diraysaa ogaysiin lagu magacaabo Ogaysiinta Tallaabo lid kugu lagaa qaado. Tani waxay kuu sheegaysaa taariikhda xayirraadu kaaga bilaaabanayso, iyo lacag intee le'eg oo ay kaa jarayaan.

Haddii aad buuxisay shuruudihii lagu helayay FSS, degmadu kuuma soo diri karto ogaysiinta talaabo lid kugu ah lagaa qaado, haddii aan lataliyahaaga shaqo raadintu uusan hayn warqad cusub uu soo qoray xirfadle caafimaadka guud, ama caafimaadka maskaxda ah oo sheegaysa in

aad raaci kartid qorshaha shaqo raadinta. La taliyaha shaqo raadinta waa in uu isku dayaa in uu kula kulmo waji ka waji ka hor inta aad ddegmadu kuu soo dirin ogaysiinta tallaabo lidi kugu ah. Haddii aadan la kulmi karin, la taliyaha shaqa gayntu ama qof uu u xilsaaray waa in uu isku dayaa in uu kugu soo booqdo guriga ugu yaraan hal mar.

## Xiyiraadu intee qaadanaysaas?

Waxay ku xirantahay marka aad la timaado waxa uu rabo la taliyaha shaqaalayntu in aad samayso. Haddii aad sugto, oo aadan waxba qaban, ilaa la gaaro 10ka maalmood ee bisha ugu dambeysa, waxaa lagaa joojinayaa MFIP bil dheeraad ah.



Haddii aad la timaado wixii uu kuu diray la taliyaha shaqo raadintu oo aad samayso **ka hor** 10ka maalmood ee bisha ugu dambeeysa, waxaad si caadi ad u helaysaa MFIP ga marka ugu horeysa ee bisha xigta.

Haddii aad la nooshahay 2 waalid oo labaduba ay saarantahay xiyiraad, deeqdu idiinma bilaabaneyso illaa ay labada waalid ay sameyeen wixii uu weydiistay la taliyaha shqo raadinta.

## Maxaan sameeyaa marka ay ii timaado ogaysiin leh ujeedo xayiraad (NOITIS)? Ma iska ilaalin kara xayiraadda?

Ogaysiinta NOITS waxay kuu sheegaysaa waxa dhibku yahay iyo sidii loo xallin lahaa intaan la gaarin in xayiraad lagu saaro. Waxaad haysataa 10 maalmood. Haddii ogaysiinta NOITS aysan ku caddayn waxa lagaa rabo in aad samayso ama aysan ku siinayn 10 maalmood gudohood in aad xaliso waxa lagaa rabo, isla markiiba racfaan qaado, wac gargaare sharci yaqaan. Sida racfaanka loo qaato waa in ay la socoto ogaysiinta NOITS. Fiiri bogga xogta urursan *Racfaan U Qaadashada DHS*.


## Ma jiraan wax kale oo aan samayn karo?

Waxaad xaq u leedahay in aad la kulanto la taliyaha shaqa raadinta ka hor inta aan xayiraad lagu saarin. Kan waxaa loo yaqaan kulan maslaxo (heshiis). Qoraal u soo gudbi la taliyaha shaqo raadinta, oo aad ku weydiisanayso kulan maslaxo.

Haddii la taliyahaaga shaqo raadinta uusan kuu soo jawaabin, wac gargaare sharci yaqaan. Waxa aad ka heli kartaa halkan 1(877) 696-6529.

**Isma beddelayo waqtigii kama dambaysta ahaa ee laguu qabtay inta aad sugayso kulanka maslaxada (heshiis**). Waad ku xalin karataa kulanka maslaxaadda wixii jira, laakin waa in aad dirtaa racfaanka.

Waxaad buuxinta iyo soo gudbinta foomka racfaan ka qaadashada si xiriir ah. Tag: https://mn.gov/dhs/.



→ Guji halka "How do I"sanduuqa bogga xagiisa sare
→ Hoos "Find" Guji "edocs and forms"
→ Guji luqadaada
→ Garaac 0033 barta baarista

Waxaa kaloo jira tilmaan bixin hadii aad rabto in aad akhriso. Si taxaddar leh u akhri foomka , buuxi wax ku qorran oo dhan markaas ka dib guji "Submit" dhanka hoose ee midig. Waxaa wanaagsan in aad ka daabacato nuqul.

## Maxaan sameeyaa haddii aanan 10 maalmood gudohood ku xallin karin?

Racfaan qaado isla markiiba. 10 maalmood gudohood ku qaado racfaan marka degmadu kuu soo dirto Ogaysiinta Tallaabo lid kugu ah, ama ka hor kowda bishii aad filanaysay in lagaa joojinayo gargaarka. Haddii aad racfaan ku qaadato waqtigan gudihiisa, AADNA codsato inaan lagu ganaaxin, lacagtaadda lama jari doono ilaa iyo inta xaakim uu ka xukumayo kiiskaaga. Haddii racfaanka lagaaga adkaado (lagaa xukumo) waa in aad soo celisaa lacagtii xayiraada laga saaray.

Waxaad racfaan qaadan kartaa 30 maalmood gudohood ka dib marka Ogaysiinta Tallaabo lid kugu ah lagaa qaaday, laakiin haddii aad racfaan qaadatid kadib marka xayiraaddu bilaabato, lacagtaas ma kuu soo noqonayso ilaa dacwadda aad ku guulaysato. Warqadda ogaysiinta NOITS waxaa ku xirran faahfaahinta racfaanka.

## Arrintaan ma xallin karo, waayo ma samayn karo waxa la taliyaha shaqaalayntu ii sheegayo in aan sameeyo.

Haddii aadan samayn karin howlaha ku qoran qorshahaaga shaqo raadiinta, waayo waxaa naftaada haysta dhib aan kuu suurta gelin karin in aad fuliso qorshahaas, u sheeg la taliyaha shaqo raadinta, racfaan qaado, la hadal gargaare sharci yaqaan. Waxaa jira sababo badan oo aan kuu ogolaanayn in aad raacdo qorshe shaqo doon oo caadi ah. La taliyahaaga shaqo wuu kaala shaqayn karaa. sababahaas waxaa ka mid ah:

- Adiga ama cid qoyskaaga ka mid ahi ay jiran tahay, dhaawacantay ama naafowday
- Addiga ama qof madaxa qoyska ka mid ah ayaa ah dhibane dagaal qoyska dhex mara.
- Waxaa lagaa rabaa in aad samayso howlo maxkamad ku soo amartay.



- Waxaad si joogta ah u aadaa dugsiga caruurtaadu dhigato sabab la xiriirta caafimaadkiisa ama dhaqankiisa.
- Waxaa ku haysta awood la'aan wax barasho oo kugu adkaynaysa in aad shaqo hesho, aad shaqo xejisatid.
- Waxaad tahay hooy la'aan, waxaad ku nooshay hooy la wadaago, waxaa lagu ogaysiiyay ama lagaa jaray biyo, nal, iyo gaas, ama gurigii waa lagaa saaray.
- Waxaa jira sababo la iska fahmi karo "sabab macquul ah". Waxaa ka mid noqon kara waxaa lagaa jaray xanaanaynta caruurta, gaadiidka, ama waxaa ku haysta arrin qoys oo degdeg ah.

Faahfaahin dheeraad ah, fiiri xogta urursan *Adeegga Xasilinta (dejinta) Qoyska (FSS)*.

**Haddi mar hore xayiraad lagu saarary** laakiin aad haysato sabab wanaagsan oo aad u diiday in aad samayso waxa uu kaa rabo la taliyahaaga shaqo raadis, kala hadal la taliyahaaga sidii aad u caddayn lahayd sabataada wanaagsan. Waa in aad dib u heshaa MFIP si oo dhamaystiran laga soo bilaabo ilaa bishii ay jirtay sababataasi. Haddii ay degmadu ku siin weydo, la hadal gargaare sharci yaqaan.

Haddii la taliyahaaga shaqo raadintu uusan kula waafaqsanayn sababaha wanaagsan ee aad u samayn wayday qorshaha shaqo raadis, wac gargaare sharci yaqaan.



## Maxaan dhacaya haddii la I saaray 7 bilood oo xayiraad ah?

7 bilood oo xayiraad ah waxay noqon kartaa hal xiyiraad oo soconaysa 7 bilood, ama 7 xayiraad oo kala duwan oo mid kasta qaadanayso hal bil. Markaad gaarto 7, waxaa dhacaya waxyaaba soo socda:

- Waxaa la xirayaa galka MFIP.
- Waa in aad la xiriirtaa la taliyaaga shaqo raadis oo aad kala shaqaysaa sidii wax loo saxi lahaa.
- Galkaaga dacwadu waa xirnaanayaa ugu yaraan hal bil ama illaa aad xaliso waxyaabihii la rabay, hadba kii soo hormara.
- Waa in aad dib u codsataa MFIP.

Ka hor intaan 100% lagu xayirin, la taliyaha shaqo raadintu waa in uu la yimaadaa hab raac gaar ah, oo ay ka mid tahay in uu kula kulmo. Sidoo kale waa in ay dib ugu noqdaan oo ay fiiriyaan xayiraadaha kale ee lagu saaray oo ay xaqiijiyaan in xayiraadda lagu saaray oo dhan ku timi sabab wanaagsan, xitaa haddii ay ku dhaaftay waqtigii laguu qabtay racfaan qaadasho oo aadan samayn.

## Maxaa dhici kara haddii ay guriga wada joogaan labada waalid?

Haddii aad la nooshahay labadaada waalid, oo mid walba la saaro xayiraad, addiga 2 xayiraad kuguma dhacayso bishiiba. Laakiin haddii xayiraadda la saaro labada waalid waqtiyo kala duwan, waa la isku dari karaa xayiraadaha ku gaarsiin kara 7 bilood oo xayiraad ah. Ma helaysid gargaarkaagii oo buuxa illaa ay labada waalid ay is kaalmaystaan oo ay muujiyaan sabab wanaagsan.

**Xayiraadda la i saaray ma iga reebi kartaa in aan helo gargaar wax ka shisheeya (ka dambeeya) 5 sano ?**

Mudada ugu dheer MFIP waa 60 bilood. Haddii ay jiraan waxyaabo dhib leh ee naftaada haysta waxaa laga yaabaa in aad hesho wax ka badan 60 bilood. Fiiri xogta urursan
*Helitaanka MFIP kadib 5ta sanno ee la xadiday: Waqti kordhin dhibaato darted*



**Iska jir:** Haddii aad ku jirto xayiraad 60ki bilood ee lagu jiray MFIP, ma dhici karto in aad hesho muddo kordhin, illa aad ku qancin kartid la taliyahaaga shaqo raadis in uu kaa tirtiro xayiraadii ugu dambeysay.

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**